

Barnaamijka Cimilo-xiridda ee U Qalmay Dakhliga



Cimilo-xiridda gurigaaga waxay ka dhigi kartaa mid tamar ku filan haysta waxayna kaa caawin kartaa inaad lacag kaydsato.

Ku bilow hadda dib u eegis tamar oo BILAASH ah!

Barnaamijka Cimilo-xiridda wuxuu ujeedkiisu yahay inuu ka caawiyo milkiilayaasha iyo kiraystayaasha u qalma ee dakhligoodu hooseeyo inay yareeyaan kharashaadka tamarta iyagoo kordhinaya waxtarka tamarta ee guryahooda. Haddii adiga ama qof aad taqaanid uu u qalmo, barnaamijkani wuxuu bixiyaa dib u eegis tamar guriga oo BILAASH ah wuxuuna ka koobnaan karaa horumarino aan WAX KHARASH AH LAGAA RABIN.

Faa'idooyinka:

Iyadoo qayb ka ah dib u eegista tamarta ee BILAASHKA ah farsamo-yaqaan khibrad u leh ayaa laga yaabaa inuu sameeyo adeegyada soo socda:

- Qiimeyn faahfaahsan oo saqafka sare ah.
- Baarida dhismaha si loo ogaado suuragalnimada daadinta kaarboon monoksaydhka
- Tijaabada albaabka daweesha raaaca
- Sawir-qaadista kulaylka iyo sawiridda iftiinka shucaacsan

Tallaabooyinka kaydinta tamarta ee laga yaabo in lagula taliyay si BILAASH ah ee barnaamijkani waxaa ka mid ah:

- Dahaaridda hoolasha iyo darbiyada kulaylka nuuga
- Hagaajinta, dayactirka, ama beddelidda nidaamyada kuleylinta
- Beddelidda haamaha biyaha kululeeya
- Xidhitaanka meelaha hawadu ka baxdo
- iyo qaar kaloo badan

Wax badan ka baro
[QualifyToWeatherize.com](https://www.QualifyToWeatherize.com).

U qalmitaanka:

- Waa in uu yahay milkiile guri ama kirayste ku sugan aagga adeegga CenterPoint Energy
- Waa in uu xadir ahaantaan ka diiwaangashan yahay islamarkaana uu ka helayo kaalmo tamareed Barnaamijka Kaalmada Tamarta (EAP) ee Wasaaradda Ganacsiga ee Minnesota.



Codso Kaalmada Tamarta



Eeg Hagayaasha Kaalmada Tamarta





Macaamiil kasta oo dhameeya dib u eegista tamarta wuxuu helayaa qalab kaydinta tamarta si uu uga caawiyo inuu xitaa kaydiyo tamar dheeraad ah. Alaabta ku jirta xirmada waxaa ka mid ah: madaxa qubeyska oo biyo yar sida, mashiinnada yareeya qulqulka biyaha ee jikada iyo musqusha, marada daaqada, laba suuf oo loogu talagalay godadka korontada iyo badhamada, kubadaha qallajiyaha ee dhogorta ah, koollo xadhig ah, iyo qalab cabbira heerkulka haanta biyaha kululeysa.

Talooyin iyo qalabyo fudud oo kaydiya tamarta ayaa kaa caawin kara inaad si weyn u yareyso isticmaalka tamarta gurigaaga!



Hagaaji heerkul-dhexeeyaha adigoo dib ugu celinaya 7–10°F habeenkii ama marka aad maqantahay ugu yaraan siddeed saacadood si aad u yareyso kharashaadka kululeynta.



Ku rakib suufyada umatada meelaha korontada gadaashooda si loo xiro meelaha hawadu ay ka baxayso.



Jooji haraayaha iyo meelaha hawadu ka baxayso adigoo adeegsanaya koollo iyo suunka cimilo-xiridda si aad guriga ugu dhigto kuleyl xilliga jiilaalka ama aad u qaboojiso xilliga xagaaga.



Marka aad dhaqayso dharka, beddel dejinta heerkulka adiga oo ka qaadaya kuleylka oo geynaya qandaca oo hadda iyo jeerna ku dhaq dhaqmo buuxda oo culus.

Booqo [CenterPointEnergy.com/EnergySavingTips](https://www.CenterPointEnergy.com/EnergySavingTips) wixii talooyin dheeraad ah!

Wax badan ka ogow barnaamijyada kale ee laga yaabo inaad u qalanto adigoo booqanaya [CenterPointEnergy.com/IQ](https://www.CenterPointEnergy.com/IQ) ama wac khadka macaamiisheena ee 612-321-HOME.

